

## Su'aalaha badanaa lays-weediiyo - bulshada

### Waa maxay kaarka xiriirka?

Kaarka xiriirka waa macluumaad cusub oo Saraakiisha Adeegyada Booliska iyo Adeegga Ilaalinta isticmaali karaan si ay u siiyaan faahfaahintooda iyo macluumaadka adeegyada taageerada xubnaha bulshada.

### Macluumaadkee ayaa ku jira kaarka?

- Magaca Boliiska ama Sarkaalka Adeegyada Ilaalinta, goobta shaqadooda, taariikhda iyo waqtiga
- Sida loo helo khadka caawimada dhibanayaasha dambiyada, tarjumaadda iyo turjumaanka
- Sida loo bixiyo [amaan ama cabasho](#) ku saabsan adeegga aad heshay.

### Xaaladaha nooc ee ah ayaan heli karaa kaarka xiriirka?

Booliiska iyo Saraakiisha Adeegga Ilaalinta iyo waxay isticmaali karaan kaarka xiriirka si ay kuu siiyaan macluumaadka ku saabsan cidda aad la hadashay, marka ay tani dhacdo iyo waxay la xidhiidhay. Waxa kale oo laga yaabaa inay ku jiraan macluumaad si ay kuugu caawiyaan wax-weydiimo dheeraad ah ama taageero. Tusaale ahaan: waxaad noqon kartaa markhaati ama dhibbanaha dembiga oo aad u baahan tahay inaad faahfaahin dheeraad ah siiso Booliiska ama Sarkaalka Adeegyada Ilaalinta oo ku saabsan dhacdada marxaladda dambe.

### Xaaladee ayaan weydiin karaa booliska ama Sarkaalka Adeegyada Ilaalinta faahfaahinta xiriirka?

Haddii Booliska ama Sarkaalka Adeegyada Ilaalinta uu ku weydiisto magacaaga iyo cinwaankaaga, waxaad sidoo kale xaq u leedahay inaad weydiiso faahfaahintooda. Waxaad weydiisan kartaa magacooda, darajadooda iyo saldhigga booliiska ee ay ka shaqeeyaan. Waxaad faahfaahintaas ku codsan kartaa qoraal ahaan. Iyadoo ku xiran xaaladda, booliisku waxay isticmaali karaan kaarka xiriirka si ay u qoraan faahfaahintooda. Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan booliska, fadlan ka eeg:

<https://www.legalaid.vic.gov.au/sites/www.legalaid.vic.gov.au/files/vla-resource-police-powers-your-rights-in-victoria.pdf>

### Maxaan sameeyaa haddii aan helo kaarka xiriirka?

Kaarka xiriirka waa diiwaanka isdhexgalkaaga ee Victoria Police. Maahan dukumiinti sharci ah oo lagaa rabo inaad haysato.

### Waa maxay sababta Victoria Police usoo bandhigtay kaararka xiriirka?

Victoria Police waxay u soo bandhigaysaa kaarka xidhiidhka iyadoo qayb ka ah balanqaadkeeda ku aadan booliska daacad iyo la hufnaan leh. Kaarka wuxuu siiyaa booliiska iyo Saraakiisha Adeegyada Ilaalinta macluumaad xirfadnimo oo dheeraad ah si ay u siiyaan xubnaha bulshada diiwaanka isdhexgalka ay la leeyihiin booliska, ka caawinaya inay helaan adeegyada, waydiiyaan su'aalo dheeraad ah ama siiyaan macluumaad booliska.

### La-tashi nooc ee ah ayaa loo qabtay si loo horumariyo kaarka xiriirka?

Victoria Police waxay la hadashay daneeyayaasha bulshada, saraakiisha Booliska iyo Saraakiisha Adeegyada Ilaalinta si ay u fahmaan sida isdhexgalka booliska iyo xubnaha dadweynaha loo hagaajin karo. Daneeyayaashani waxay gacan ka geysteen inay qaabeeyaan fikradaha ku saabsan macluumaadka lagu dari karo kaararka, tixgelinta ku saabsan naqshadeynta iyo kor u qaadidda wacyiga bulshada dhexdeeda.